

DUGSIYADA DADWEYNAHA BOSTON



XAFIISKA KORMEERAHA GUUD

QORAAL OGAYSIIN AHAANEED

KUSOCOTA: Guddoomiyaha iyo Xubnaha Guddiga Dugsiyada Boston

KA SOCOTA: Mary Skipper
Kormeeraha Guud

MAWDUUCA: Deeqaha Ansixinta

TAARIKHDA: Julaay 17, 2024

Lifaaqa fadlan ka raadi deeqaha ay dhaqaajin doonaan Guddiga Dugsigu si ay u ansixiyaan Julaay 17, 2024. Haddii aad rajaynayso inaad dib ugu eegto tan si faahfaahsan, soo jeedinaha deeqda ee dhammayska tiran waxa loo gudbiyay Xafiiska Xog-haynta Gudiga Dugsiga

Waad ku mahadsan tahay wada shaqayntaada. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, shaqaalaha ayaa jooga oo kuu jawaabaya.



XAFIISKA SARKAALKA UGU SARREEYA MAALIYADA

QORAAL OGAYSIIN AHAANEED

KUSOCOTA: Mary Skipper
Kormeeraha Guud

KA SOCOTA: Anu Jayanth

MAWDUUCA: Deeqaha Ansixinta

TAARIKHDA: Julaay 17, 2024

Fadlan lifaaqan ka raadi deeqaha ay ansixiyeen Gudiga Dugsiga. Nuqullada dhammayska tiran ee soo jeedinta deeqda ayaa diyaar u ah dib u eegistaada waxaana loo gudbin doonaa Xafiiska Xoghayaha Guddiga Dugsiga.

Saxeexa:

ANSIXINTA DEEQAHA GUDDIGA DUGSIGA
Julaay 17, 2024

Tirada	FY	Magaca Deeqda	Xaallada	Maamulaha Lacagta	Aagga(agga) Diiradda	Goobaha
\$ 10,000.00	FY24	Dhisida Bulshada iyadoo loo marayo filim	Cusub	Cesar Ortega	Kobcinta Ardayga	Dugsiga Mildred Ave K-8
\$ 1,124,550	FY25	BPS Waxbarashada Akhris-qoraalka Qoyska ee Dadka Waaweyn	Sii waditaan	Kristen D'Avolio	Bartayaasha Luuqadda Ingiriisiga	Degmadoo dhan
\$ 191,344	FY25	MassStep	Sii waditaan	Kristen D'Avolio	Waxbarashada Dadka Waaweyn	Waaxda Waxbarashada Dadka Waaweyn/Xarunta Dugsiga Sare ee Dadka Waaweyn ee Boston
\$ 1,325,894.00	WADARTA					

FOOMKA AQBALKA GUDDIGA DUGSIGA

Magaca Deeqda: Dhisida Bulshada iyadoo loo marayo filim

Ujeedo: Dugsiga Mildred Ave K-8 waxay raadinayaan shuraako cusub oo ah shirkad loo yaqaano Akaadamiyada FC si ay u siiyaan kooxda filimka dugsiga kadib halkaasoo ardayda ay fursad u helayaan inay dhisaan bulsho oo ay samaynayaan filimo gaagaaban oo ay iyagu leeyihin taasoo ay kaga qaybgali karaan bandhiga filimaanta ee ay soo qabanqaabiyaan Filmmakers Collaborative. Ardaydu waxay la kulmi doonaan shaqaalaha Akaadamiyada FC laba jeer toddobaadkii muddo 30 toddobaad ah oo ay helaan qalab si heersare ah loogu duubi karo muuqaalada iyo sooftiweerka ay siin doonto shirkadu. Akaadamiyada FC waxay leedahay khibrad balaadhan oo ah dhinaca ardayda dugsiga dhexe iyo dhagaystayaasha la beegsanayo ee lamidka ah dadka dugsiyadeenna wuxuuna si deeqsinimo ah u soo bandhigay inuu kabo qayb weyn oo ka mid ah kharashka dhabta ah ee barnaamijka si aan u awoodno inaan la shaqayno bulshadeena. Barnaamijku wuxuu sidoo kale wadashaqayn la yeelan doonaa macalinka tiyaatarka, Ms. Villa, iyo macalinkayada muusigga, Mr. Leland, mashaariicda socota si ardaydu ay u helaan fursad ay kaga shaqeeyaan agabkooda inta lagu jiro maalinta dugsiga iyo sidoo kale inta lagu jiro dugsiga ka dib. Waakan linkiga kanaalkooga [youtube\(https://www.youtube.com/channel/UC0ZvtliPT_TZWlv0Ju3jHQw\)](https://www.youtube.com/channel/UC0ZvtliPT_TZWlv0Ju3jHQw) Halkaas oo aad ka dheehan karto qeybo kamid ah shaqooyinkoodii hore ee ay la qabteen ardayda guud ahaan gobolka Massachusetts.

Taariikhda Bilaabashada Deeqda: Abril 24, 2024

Taariikhda Dhammaadka deeqda: Juun 24, 2024

Xaallada: Abaalmarinta

Nooca Deeqaha: Kawada Shaqaynta Deeqda Boston University

Maamulaha Deeqda: Cesar Ortega

limayl: cortega@bostonpublicschools.org

Taleefanka:

Isha Deeqda: Wada Shaqaynta Boston University

Xiriiriyaha deeq bixiyaha: Aaron Brkonecki

Xiriiriyaha deeq bixiyaha: Aan lahayn

Telefoonka:

limayl: brak@bu.edu

Qadarka Abaalmarinta Sannadka: \$10,000

Ikhtiyaarka nuqlinta: Aan lahayn

Qiyaastii # arday (ama macalimiinta, shaqaalaha xafiiska dhexe) ayaa u adeegay:

Goobaha: Mildred Ave. Dugsiga Dhexe

Shuraakada Furaha ee Dibadda (haddii ay jiraan):

Sharaxaada Deeqaha

Dugsiga Mildred Ave K-8 waxay raadinayaan shuraako cusub oo ah shirkad loo yaqaano Akaadamiyada FC si ay u siiyaan kooxda filimka dugsiga kadib halkaasoo ardayda ay fursad u helayaan inay dhisaan bulsho oo ay samaynayaan filimo gaagaaban oo ay iyagu leeyihin taasoo ay kaga qaybgali karaan bandhiga filimaanta ee ay soo qabanqaabiyaan Filmmakers Collaborative. Ardaydu waxay la kulmi doonaan shaqaalaha Akaadamiyada FC laba jeer toddobaadkii muddo 30 toddobaad ah oo ay helaan qalab si heersare ah loogu duubi karo muuqaalada iyo sooftiweerka ay siin doonto shirkadu. Akaadamiyada FC waxay leedahay khibrad balaadhan oo ah dhinaca ardayda dugsiga dhexe iyo dhagaystayaasha la beegsanayo ee lamidka ah dadka dugsiyadeenna wuxuuna si deeqsinimo ah u soo bandhigay inuu kabo qayb weyn oo ka mid ah kharashka dhabta ah ee barnaamijka si aan u awoodno inaan la shaqayno bulshadeena. Barnaamijku wuxuu sidoo kale wadashaqayn la yeelan doonaa macalinka tiyaatarka, Ms. Villa, iyo macalinkayada muusigga, Mr. Leland, mashaariicda socota si ardaydu ay u helaan fursad ay kaga shaqeeyaan agabkooda inta lagu jiro maalinta dugsiga iyo sidoo kale inta lagu jiro dugsiga ka dib. Waakan linkiga kanaalkooga [youtube\(https://www.youtube.com/channel/UC0ZvtliPT_TZWlv0Ju3jHQw\)](https://www.youtube.com/channel/UC0ZvtliPT_TZWlv0Ju3jHQw) Halkaas oo aad ka dheehan karto qeybo kamid ah shaqooyinkoodii hore ee ay la qabteen ardayda guud ahaan gobolka Massachusetts.

Natiijooyinka la Doorbiday/Tixgalinta leh (eeg xaga hoose)

Hadafyada Mashruuca

Waxaan filasho sare ka qabnaa shuraakadan cusub oo waxaan marhoreba kala tashanay agaasimaha shirkada hadafyadeenna ku aadan sannad dugsiyeedka xiga.

Hadafka 1 Kordhi dareenka lahaanshahimo ee ardayga dugsiga dhexe ee Mildred Ave. Sida uu muujinayo sawiraanta kujira lifaaqa hoose (natiijooyinka wakhti kasoo wareegay https://drive.google.com/file/d/13n68g0Cs-c3aB3jLoYbs9aTiqDvVsbpX/view?usp=drive_link, imtixaanada iskudhafan ee guud ahaan dugsiga https://drive.google.com/file/d/1Ya0sL0xfEXaHilFeyhQMCoVI3zfAEI3h/view?usp=drive_link, and lahaanshaha su'aalaha https://drive.google.com/file/d/1R59Pd5sGMQMCOB83HvYem_-GhwxTPITQ/view?usp=drive_link) lagasoo bilaabo xog-ururintayada cimilada jilaalka kaliya 43% ardaydayada fasalada 6-8 ayaa uga jawaabay si wanaagsan su'aalaha la xidhiidha lahaanshaha ardayda. Iyadoo ay tani boqolkiiba shan ka sarraysay celceliska degmada, waxaan ognahay inaan si ka wanaagsan wax u qaban karno! Waxaan ku kalsoonahay haddii dhinacan dhaqanka dugsiyeenna la wanaajiyo inay ku yeelan doonto saamayn wanaagsan dhinaca dareenka lahaanshaha iyo sidoo kale xaadiriska ardayda iyo hawlaha fasalka dhexdiisa.

Hadafka 2 Siinta goob manjah dheeraad ah lagu siiyo ardayda dugsiga dhexe ee danaynaya farshaxanka si ay u kobciyaan xirfadaha oo ay u dhisaan bulsho. Ka dugsi ahaan waxaan haysanaa doorshooyin kooban oo dugsiga dhexde kadib ah kuwaasoo ardayda xiisaynaysa

ciyaaraha sida kubada kolayga iyo kubada birta shabaga ah lagu ciyaaro, laakiin fursado aad u kooban ayaa loo heli karaa ardayda xiisaynaya farshaxanka. Markan raadinaynay shirkad aan si macquul ah ula shaqayno, waxaanu is aragnay Akaadamiyada FC oo waxaan xaqiiqsanay filimkaas, in uu yahay mid farshaxamaysan, oo kali ku ah awooddiisa uu iskugu keenayo noocyo badan oo farshaxan ah isla markaana si fiican loogu ladhay muusig, farshaxan muuqaal (iyo suurto galnimada nashqado sawiro), qoraal, jilitaan, habaynta. Intaa waxa dheer, arday aad u badan oo isticmaala baraha bulshada, arday badan ayaa xiisaynaya muuqaal samaynta. Rajada ayaa ah in kooxdan filimaantu ay noqoto meel ay ku kulmaan farshaxanimada halkaas oo dhammaan ardayda xiiseeya farshaxanka ay boos uga heli karaan nafahooda.

Hadafka 3 Kordhinta khayraadka taageeraya aqoonta ardayda dugsiga dhexe, gaar ahaan dhinaca la xidhiidha horumarinta akhris-qoraalkooga. Dugsi ahaan waxaan leenahay waxbaris diirada saaraysa horumarinta akhris-qoraalka loo siman yahay (eeg qalabka degmada ee faahfaahinaya:

<https://sites.google.com/bostonpublicschools.org/ogequityandclsptoolkit/equitable-literacy-instruction>). Xogta qiimayntayada akhriska MAP ee ugu dambaysay (https://drive.google.com/file/d/1STjlbhTtIH3tiwMXMOxIMIdIMCsltytcp/view?usp=drive_link) we have noticed that not all students are growing their skills at a rate we would like. Tani waxay si gaar ah u khusaysaa ardayda "casaanka kujira" sababtoo ah xogtaasi waxay si dhab ah inoogu sheegaysaa in ardaydani aanay ahayn oo kaliya in ay ka dambeeyaan heerar kala duwanaansho xagga horumarin akhris-qoraalka iyo balse aanay hadda samaynayn horumarkii degdega ahaa ee lagama maarmaanka u ahaa inay la jaanqaadaan filkooda qaranka guud ahaan ka hor dugsiga sare.

Fadlan sheeg sida deeqdan ay u qoondaynayso goobaha ay diirada saarayso degmadu (Fadlan dooro degmada Mudnaanta la siinayo/mudnaanta leh ee deeqdani la jaan qaadayso oo sharax kooban ka bixi wax aan ka badnayn laba jumladood Qaybtan waa in si buuxda loo dhammaystiraa):

- Mudnaansiinta iyo Dhaqaajinta Waxqabadka Aqoonta X
- Helitaanka Xoojinta Helitaanka Waxbarashada Dareenka bulshada X
- Hagaajinta Hawlaha iyo Xaqiijinta Badbaadada Ardayga
- Horumarinta Dhaqanka Qoyska iyo Ka qaybgalka Bulshada ee Saxda ah
- Horumarinta Isgaadhsiinta Gudaha iyo Dibadda ee Qoysaska iyo Shaqaalaha
- Kordhinta La Xisaabtanka Xafiiska Dhexe iyo Dugsiyadeena labadaba

Mashruucu wuxuu kor u qaadi doonaa sinnaanta, kala duwanaanshaha iyo ka mid noqoshada iyadoo si fudud loo siinayo dhammaan ardaydeena fasalada 6-8. Mashruucu wuxuu dhisi doonaa bulshada wuxuuna abuuri doonaa dareen ka mid lahaanshaha ardayda si loo xoojiyo barashada shucuurta bulshada. Kooxdu waxa ay sidoo kale rajaynaysaa horumarintan dhaqanka dugsiga dhexe in ay si wanaagsan u saamayso horumarka akhris-qoraalka ee ardayda marka la eego nooca mashaariicda ardaydu ka shaqayn doonaan sannad dugsiyeedka oo dhan. si toos ah ula shaqaynta ardayda xirfadahooda hal abuurka leh sida "wadashaqaynta maskax tuujinta, fikradaha sheeko-qorista, maaraynta sheekada, Qoraalka jiliinta, maaraynta wakhtiga," iyo xirfadaha farsamada sida "duubista muuqaalka, iftiiminta, duubista maqalka, naqshadaynta dhawaaqa iyo isku-dhafka, tafatirka iyadoo la adeegsanayo sooftiweer aqoonaysan."

FOOMKA AQBALKA GUDDIGA DUGSIGA - BPS25103

Magaca Deeqda: BPS Waxbarashada Akhris-qoraalka Qoyska ee Dadka Waaweyn

(BPS25103, FC345)

Ujeedo: Sii fasalada dugsigga sare iyo luuqadda Ingiriisiga dadka waaweyn ee Boston.

Taariikhda Bilaabashada Deeqda: Julaay 1, 2024

Taariikhda Dhammaadka deeqda: Juun 30, 2025

Xaallada: Sii waditaan

Nooca Deeqaha: Tartan

Maamulaha Deeqda: Kristen D'Avolio, Agaasime Sare, Waaxda Waxbarashada Dadka Waaweyn

limayl: kdavolio@bostonpublicschools.org

Taleefanka: 617-635-9300

Isha Deeqda: State -CALC 345

Xiriiriyaha deeq bixiyaha: Melissa Viscovich

Taleefanka Deeq bixiyaha: 781-338-3816

limaylka Deeq-bixiyaha: Melissa.b.Viscovich@mass.gov

Qadarka Abaalmarinta Sannadka: \$ 1,124,550

Wadarta Qadarka Abaalmarinta (haddii deeqda muddada sannad ka badan):

Ikhtiyaarka nuqlinta: Maya

Qiyaasta # ardayda: 140 Ardeyda Waaweyn ee Dugsiga Sare, 115 Arday oo Arday Waaweyn ESOL

Goobaha: Waaxda Waxbarashada Dadka Waaweyn/Xarunta Dugsiga Sare ee Dadka Waaweyn ee Boston

Wada hawlgalayaasha Furaha ee Dibadda: Tech Goes Home, Qorshaha Akhriska iyo Qoraalka ee Dadka Waaweyn, Masshire

Qeexitaanka Deeqda: Deeqdani waxay siisaa waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn, dugsigga sare iyo fasalada ESOL muwaadiniinta qaangaarka ah si ay u taageeraan horumarkooda waxbarasho, dhaqaale iyo bulsho. Fasalada waxaa lagu bixiyaa si fool ka fool ah, khadka tooska ah, maalinta iyo fiidkii.

Natijjooyinka la Rabo: Natijjooyinka la doonayo ee deeqdan waxaa ka mid ah: 1) balaarinta helitaanka waxbarashada luqadda waalidiinta ardayda BPS iyo guud ahaan bulshada Boston si loo dhimo tirada muwaadiniinta liiska sugitaanka fasalada luqadda Ingiriisiga; 2) in waalidiinta BPS la siiyo raasamaal bulsho si ay ugu dhex maraan ururada waxbarashada iyo bulshada si

ay si wanagsan u taageeraan naftooda iyo caruurtooda, iyo 4) siinta ardayda waaweyn barashada tacliinta dhijitaalka ah taasoo u ogolaanaysa inay si wanaagsan ula falgalaan qoysaskooda, bulshooyinkooda, iyo shaqaaleeyayaasha.

Himilooyinka Gaarka ah, La Cabbir karo, La Gaadhi Karo, La Xaqiijin karo, iyo Wakhtiga Ku Xidhan (SMART)

Yoolka # 1: FY25, BPS Adult Ed waxay la kulmi doontaa ama dhaafi doontaa hiigsiga MSG (58%) ee ardayda ESOL ee ay dejisay DESE oo lagu qiyaaso BestPLUS iyo TABE Class-E. Tilmaame: FY24/25 ee kahor iyo kadib dhibcaha imtixaanka.

Yoolka # 2: FY25, Adult Ed wuxuu la kulmi doonaa ama dhaafi doonaa hiigsiga MSG (40%) ee ardayda ABE/ASE ee ay dejisay DESE oo lagu qiyaaso MAPT. Tilmaame: FY23/24 ee kahor iyo kadib dhibcaha imtixaanka.

Hadafka # 3: FY25, waxaanu ku sugnaan doonaa ama ka sareeya 90% ee heerka diiwaangelinta yoolka sanadka oo dhan. Tilmaame: Xogta diiwaangelinta LACES

Hadafyadan guulgaaritaanka iyo isdiwaangelinta waxaa dejisay DESE ACLS iyadoo lagu salaynayo xogta federaalka ee NRS ee ardayda qaangaarka ah ee dalka oo dhan.

Fadlan sheeg sida deeqdan ay u qoondaynayso goobaha ay diirada saarayso degmadu (Fadlan dooro degmada Mudnaanta la siinayo/mudnaanta leh ee deeqdani la jaan qaadayso oo sharax kooban ka bixi wax aan ka badnayn laba jumladood Qaybtan waa in si buuxda loo dhammaystiraa):

- Kala hormarinta iyo Dardar gelinta Waxqabadka Tacliinta: Deeqdani waxay siinaysaa fursad labaad oo ay ku kasban karaan shahaado dugsi sare ee ardayda qaangaadhka ah ee ka weyn K-12.
- Horumarinta Dhaqanka Qoyska iyo Ka qaybgalka Bulshada ee Saxda ah: Deeqdani waxay kordhisaa helitaanka fasalada luuqadda Ingiriisiga ee waalidiinta ardayda BPS.

FOOMKA AQBALKA GUDDIGA DUGSIGA - BPS25687

Magaca Deeqda: MassStep (BPS25687)

Ujeedo: Tababar sii 20 xubnood oo ka tirsan bulshada gaar ahaan dadka

waaweyn si ay uga shaqeeyaan qeybaha martigelinta iyo 30 xubnood oo bulshada ah si ay ugu diyaar garoobaan imtixaanka ParaPro iyo xirfadaha waxbarasho.

Taariikhda Bilaabashada Deeqda: Julaay 1, 2024

Taariikhda Dhammaadka deeqda: Juun 30, 2025

Xaallada: Sii waditaan

Nooca Deeqaha: Tartan

Maamulaha Deeqda: Kristen D'Avolio, Agaasime Sare, Waaxda Waxbarashada Dadka Waaweyn

limayl: kdavolio@bostonpublicschools.org

Taleefanka: 617-635-9300

Isha Deeqda: DESE -359 MassStep

Xiriiriyaha deeq bixiyaha: Derek Kalchbrenner

Taleefanka Deeq bixiyaha: 781-338-3812

limaylka Deeq-bixiyaha: Derek.Kalchbrenner@mass.gov

Qadarka Abaalmarinta Sannadka: \$ 191,344

Wadarta Qadarka Abaalmarinta (haddii deeqda muddada sannad ka badan):

Ikhtiyaarka nuqlinta: Maya

Qiyaasta # ardayda: 50 ardayda ((2 kooxood oo 15 ah iyo 2 kooxood oo 10 ah))

Goobaha: Waaxda Waxbarashada Dadka Waaweyn/Xarunta Dugsiga Sare ee Dadka Waaweyn ee Boston

Wada hawlgalayaasha Furaha ee Dibadda: Tech Goes Home, Qorshaha Akhriska iyo Qoraalka ee Dadka Waaweyn, Masshire

Sharaxaada Deeqaha: MassSTEP waxay daraasaysaa hababka gobolka oo dhan ee u diyaariya ardayda qaangaarka ah shaqooyin rajo leh oo leh meherado firfircoon oo Massachusetts ah. Waxay ka faa'iidaydaysataa la kaashiga ka dhexeeya waxbarashada, tababarka shaqada, iyo loo shaqeeyayaasha si loo dhiso waxbarasho cusub oo joogta ah iyo fursadaha horumarinta shaqaalaha ee ardayda qaangaarka ah. Iskaashatada MassSTEP waxay wada shaqeeyaan si ay u abuuraan nidaam ka xoog badan oo siman oo horumarinta xoogga shaqada ee Dawlada Dhexe. Barnaamijkan wuxuu tababar siinayaa 20 xubnood oo ka tirsan bulshada gaar ahaan dadka waaweyn si ay uga shaqeeyaan qeybaha martigelinta iyo 30 xubnood oo bulshada ah si ay ugu diyaar garoobaan imtixaanka ParaPro iyo xirfadaha waxbarasho.

Natijjooyinka la Rabo: Natijjooyinka la doonayo ee deeqdan waxaa ka mid ah: 1) u fidinta xubnaha bulshada fursad ay kaga qaybqaataan tababarka warshadaha u horseedi kara

mushahar joogta ah qoyska; iyo 2) siinta ardayda qaangaarka ah tilmaamaha u diyaarsanaanta xoogga shaqada taasoo u oggolaanaysa inay si wanaagsan ula macaamilaan bulshadooda, iyo shaqaalaysiiyayaashooda.

Himilooyinka Gaarka ah, La Cabbir karo, La Gaadhi Karo, La Xaqiijin karo, iyo Wakhtiga Ku Xidhan (SMART)

.

Yoolka # 1: Marka la gaaro Juun 30, 2024, afartan iyo afar kamid konton arday ayaa dhammayn doona koorsada buuxda oo ay kasban doonaan shahaadooyinka warshadaha ee la xariira.

Tilmaame: Dhameystirka shahaadada TIPS, ServeSafe iyo gudbinta dhibcaha imtixaanka shahaadiga ah ee Maareynta Martigelinta ee Hotel American & Lodging Institute, ama imtixaanka ParaPro.

Yoolka # 2: Marka la gaaro Oktoobar 2025, 35 kamid ah 50 arday ayaa laga shaqaaleysiin doonaa shaqo xirfad ahaaneed.

Tilmaame: Warqadda caddaynta loo-shaqeeyaha ama warqadda mushaharka.

Yoolka # 3: Marka la gaaro Juun 30-keeda, 2025 35 kamid ah 50 arday ayaa muujin doona hormarka luuqadda.

Tilmaame: Dhibcaha DESE ee loo idmaday imtixaanka TABE iyo macalinku wuxuu sameeyay qiimayno.

Fadlan sheeg sida deeqdan ay u qoondaynayso goobaha ay diirada saarayso degmadu (Fadlan dooro degmada Mudnaanta la siinayo/mudnaanta leh ee deeqdani la jaan qaadayso oo sharax kooban ka bixi wax aan ka badnayn laba jumladood Qaybtan waa in si buuxda loo dhammaystiraa):

- Horumarinta Dhaqanka Qoyska iyo Ka qaybgalka Bulshada ee Saxda ah: Deeqdani waxay kordhisaa helitaanka fasalada luuqadda Ingiriisiga iyo fasalada tababarka xirfadeed ee waalidiinta ardayda BPS.